

PapScreen Victoria

Fact sheet

Somali

Natijada aan Caadiga ahayn ee Baaritaanka ilmagaleenka afkiisa (Pap test)

Waa maxay Baaritaanka ilmagaleenku?

Baaritaanka ilmagaleenku waa sahlan yahay waana degdeg waxaana la eegaa inuu ku dhacay isbedel aan caadi ahayni unugyada ilmagaleenka. Haddii isbedeladaan la hello waxna laga qabto waqtii hore, ilaa 90% noocyada kansarka ilmagaleenka ayaa laga hortegi karaa.

Waa maxay baaritaanka ilmagaleenka ee aan lagu qanacsanayni?

Baaritaanka ilmagaleenka aan lagu qanacsanayn waa kan shaqaaluhu aanay u arkin unugyada si wanaagsan kana bixin karin warbixin. Xaalladu markay sidaas tahay waxaa laga yaabaa in lagu weydiisto in lagu celiyo baaritaanka. Tani ma keenayo sabab loo argagaxo.

Marmarka qaarkood, baaritaanka ilmagaleenku wuxuu muujiyaa calaamado caabuq. Haddii baaritaanka ilmagaleenku noqdo mid lagu qanco, waxaa lagu weydiisan doonaa inaad samayso baaritaanka soo socda laba sano ka dib.

Waa maxay macnaha baaritaan ‘caadiga ah’?

Baaritaanka ilmagaleenka aan caadiga ah macnihisu waa marka unugyada ilmagaleenka qaarkood ka duwan yihiin unugyada caadiga ah. Tani waxay ku dhacdaa 1 baaritaan 15kii baaritaanba. Natijada aan caadiga ahayn macneheedu wuxuu noqon karaa, laakiin aan qaalib ahayn, kansarka ilmagaleenka wuxuuna noqon karaa wax aan caadi ahayn sababa badan dartood.

Noocyada aan caadiga ahayn

Waxyallaha aan caadiga ahayni waxay noqon karaan kuwa heerkoodu hooseeyo iyo kuwa heerkoodu sarreeyo.

Waxyallaha aan caadiga oo heerkoodu hooseeyo

Isbedeladaan yaryari badanaa waa iska baaba'aan. Kuwaan caadiga ahayn ee heerkoodu hooseeyo waxaa keena fayraska loo yaqaan Human Papilloma Virus (HPV). HPV-gu badanaa waa dhaca 5tii dumarana 4 ka mid ah ayaa laga hellayaa HPV. Dumarka yeesha HPV badankood ma yeellan doonaan kansarka ilmagaleenka.

HPV waxaa la isugu gudbiyaa istaabashada maqaarka taranka. Jirku badanaa wuxuu fayraska jirka kaga saaraa 1-2sanadood. Marka nooc ka mid ah HPV-gu ku negaado halkaas dhowr sano, waxaa jiri karta khatar siyaadaysa oo ah kansarka ilmagaleenka.

Daawaynta heerkeedu hooseeyo

Haddii baaritaankaagii hore caadi ahaa, dhakhtarkaaga ayaa ku weydiisan doona inaad soo noqoto si baaritaan kala lagugu sameeyo 1 sano ka dib. Taasi waxay jirka u ogolaanaysaa inuu iska saaro infakshanka HPV-ga waxyallaha aan caadiga ahaynina keligood isa saxaan.

Haddii tan lagu celiyey ay noqoto wax aan caadi ahayn waxaa laguu gudbin doonaa qof khibrad takhasus ah u leh si loo adeegsado colposcopy. Dhakhtarkaagu wuxuu adeegsan doonaa qalabka loo yaqaan colposcope, kaas oo weyneeya aragtida si loo hubiyo waxyaallaha aan caadiga hayni intay le'eg yihiiin iyo siday yihiiin.

Dumarka qaarkood leh heer hooseeya ayaa laga yaabaa in toos loogu xawilo colposcopy iyadoo aan loo baahan in lagu celiyo baaritaanka.

Waxyaallaha aan caadiga ahayn ee xad-dhaafka ah

Waxyaallaha aan caadiga ahayn ee heerkoodu xad-dhaafka yahay aad ayey khatar ugu yihiiin unugyada ilmagaleenka, haddii aan wax laga qaban, kaas oo u badan inuu noqdo kansarka ilmagaleenka. Wuxuu qaataa ilaa tobant sano in meelaha aan caadiga isu bedelaan kansarka ilmagaleenka.

Daaweynta waxyaallaha aan caadiga ahayn ee xad-dhaafka ah

Haddii aad qabto waxyaalaha aan caadiga ahayn ee xad-dhaafka ah dhakhtarkaagu (GP) wuxuu kuu gudbin karaa dhakhtar khibrad u leh si loo sameeyo baaritaan dheeraad ah iyadoo la isticmaalayo qalabka colposcopy. Marka la sameynayo colposcopy, unugyo ama cadad yaryar (biopsy) ayaa laga yaabaa in loo diro sheybaar si loo baaro.

Waxaa jira dhowr siyood oo loo daaweyn karo, iyadoo ku xiran sida xaalladu u xun tahay. Habab kala duwan ayaa la isticmaalaa si looga saaro unugyada aan caadiga ahayn ilmagaleenka, intooda badnina waxay u baahan yihiiin inay maalintaas keliya isbitaalka joogaan.

Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan baaritaanka Ilmagaleenka iyo waxyaallaha aan caadiga ahayn ama inaad dalbato buugga yar ee loo yaqaan Pap test Results - A guide for women with an abnormal Pap test la xiriir Golaha Kansarka ee Fiktooriya khadkiisa caawimada tel: 13 11 20 ama booqo www.papscreen.org.au

Macluumaad intaas ka badan oo afka Soomaaliga wac 03 9209 0169

An English version of this fact sheet can be found at www.papscreen.org.au